Su'aalaha Badanaa La isweydiiyo ee Barnaamijyada Diiwaangelinta Onleenka Pre-K ee Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb (3&4)

Barnaamijyada Ka qeybqaatayaasha Baqtiyaanasiibka-Hore Onleenka ee 2025-2026 Pre-K (3&4)

Qeybtaan waxay warbixin siisaa waaladiinta/masuulada xiiseynaya dhameystirka nidaamka codsiga ee baqtiyaanasiibka onleenka 2025-2026 Pre-K (3&4). Hubi inaad aqrisid dhammaan qeybaha haray ee dokumintigaan oo tallaabooyinka xiggo ah.

Waa maxay sharuudaha da'da ee ardayda si ay isaga diiwaangeliyaan barnaamijyada Pre-K (3&4)?
Si ugu qalmo sannad dugsiyeedka 2025-2026, taariiqda dhalashada canugaaga waa inuu ku jiraa ama u dhaxeeyaa taariiqaha xiggo: Sebteembar 2, 2020-Sebteembar 1, 2021 oo Pre-K4 iyo Sebteembar 2, 2021-Sebteembar 1, 2022 ee Pre-K3.

Haddii canugeyga laga siiyo korsi Baqtiyaanasiibka Pre-K3 oo uu ka qeyb galo fasalka Pre-K3 inta lagu jiro sannad dugsiyeedka hadda ee Xarunta Coralwood, Xarunta Waxbarashada Hore, iyo/ama goobta ballaarinta Pre-K3, miyaa loo ogolaanayaa inay sii joogaan goobtada hadda ee Pre-K4?
Sababo la xiriirto Xarunta Coralwood, Xarunta Waxbarashada Hore, iyo fasalada ballaarinta Pre-K3 ee ah barnaamijyada gaarka ah oo hoos yimaada baaxada Waaxda Waxbarashada Hore iyo Barnaamijyada Pre-K, ardayda waxay helayaan iqtiyaarka ay ku cadeeyaan Pre-K oo goobtooda hadda oo dhinaca **qaabeynta barnaamijka**. Waaladiinta waxay helayaan iqtiyaarka ay ku dhameystiraan foomka **Rabitaanka Ku laabashada** si ay u sii joogaan goobtooda hadda. Haddii lagu guuldareysto dhameystirka foomka **Rabitaanka Ku laabashada** waxay lumineysaa korsiga Pre-K4 ee canugaaga ee goobtooda hadda oo sannad dugsiyeedka soo socdo. Waaladiinta **doorto** inay ku soo laabtaan waaya aragnimada waxbarashada Pre-K4 ee goobta hadda ee canugooda **waxaa** looga damaanad qaaday korsi baqtiyaanasiibka soo socdo ee aaga dugsiga gurigooda. **Waaladiinta doorta iqtiyaarka waxaa looga baahanayaa inay codsadaan aaga baqtiyaanasiibka dugsigooda ee Pre-K4. Dhammaan waaladiinta hadda ee Pre-K3 ee doorto ama saxiixo foomka Rabitaanka Ku laabashada waa inay dhameystiraan iyo arjiga loogu gudbinayo baqtiyaanasiibka.**

Haddii canugaaga ku noolyahay meel ka baxsan aagga ka qeybgalka Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb (DCSD), miyaa isaga/iyada u qalmaa inay ka qeybqaataan barnaamijka Pre-K (3&4)?
Maya. Haddii ciwaanka aanan ku jirin aaga Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb, xaq uma lihid inaad ka qeybqaadatid. Haddii aadan hubin haddii ciwaankaaga uu ku yaalo DCSD, fadlan ka gal Raadiyaha Dugsiga si aad u xaqiijisid ciwaankaaga.

Miyaa la ii ogolyahay codsashada wax ka badan hal dugsi?
Ma ya. Waad codsan kartaa midkood theme school, Coralwood, iyo/ama Xarunta Waxbarashada Hore haddii ay quseyso, ama dugsiga gurigaaga. Haddii aad dooratid inaad codsatid dugsiga theme, Coralwood, ama Xarunta Waxbarashada Hore oo aan lagu dooran, waxaa si toos ah laguugu meeleynayaa liiska sugitaanka.

Ka waran haddii canugeyga uu u qalmo Dugsiga barbaarinta, laakiin aadan ka qeybqaadan barnaamijka gobolka uu maalgeliyay ee Pre-K4, miyay weli u qalmaan inay iska diiwaangeliyaan Pre-K4?
Si aad ugu qalantid sannad dugsiyeedka 2025-2026 sida ardayga Pre-K4, canugaaga waa inuu lahaadaa Qorshaha Waxbarashada Gaarka ah (IEP) oo aqoonsado baahida ah inay sannadkooda Dugsiga barbaarinta ku qaataan ka mid noqoshada fasalka (wada-barida) Pre-K4.

Ma in canugeyga ahaadaa canug u tababaran tuunjiga si looga diiwaangeliyo barnaamijka Pre-K (3&4)?

Canugaaga waxaa laga filanayaa inay u suurtogasho inuu qaabilo shaqooyinka is caawinta sida labisashada, dhar iska dhigida, iyo baahiyada musqusha. Carruurta waa in lagu tababaraa tuunjiga ka hor intaan laga diiwaangelin gelida Pre-K (3&4). Waaladiinta waa la soo wacayaa haddii shil uu dhaco oo waxaa looga baahanayaa imaanshaha dugsiga si ay u badelaan canugooda. Ardayda looma ogolo inay u soo xirtaan dugsiga dabagaabyada illaamaa lagu tilmaamo sida inay ka qeybtahay Qorshaha Waxbarashada Gaarka ah (IEP) ama qorshaha 504 iyo canuga wuxuu ku jiraa fasalka iskaashiga, marka isaga/iyada waxaa caawin karo macalinka/gargaaraha baahida gaarka ah.

Sida shaqaalaha DCSD, miyaan helayaa diiwaangelin toos ah oo baqtiyaanasiibka Pre-K (3&4)?
Maya. Sida shaqaale DCSD waa inaad martaa dhinaca isla nidaamka baqtiyaanasiibka sida qof walboo kale. Si kastaba, waxaa jiro sharuudo gaar ah ka hor inta aysan shaqaalaha geli karaan baqtiyaanasiibka Pre-K (3&4). Fadlan la soo xiriir maamulaha dugsigaaga ama Waaxda Waxbarashada Hore iyo Barnaamijka Pre-K oo Heshiiska Ka qeybqaadashada Shaqaalaha ee Baqtiyaanasiibka DeKalb Pre-K (3&4).

Canugeyga afar sanno jirka ah wuxuu leeyahay IEP oo hadda kama diiwaangashano DCSD. Miyay ku harayaan dugsiga gurigeyga haddii isaga/iyada lagu qaado lootada?
Haddii codsadaha leh Qorshaha Waxbarashada Gaarka ah (IEP) waxaa loo xushaa inuu ka qeybgalo fasalka waxbarashada Pre-K ee Bright from the Start (BFTS), codsadaha waxaa suurtogal ah in loo wareejiyo fasalka ka mid noqoshada BFTS sida ku saleysan baahiyaha shaqsiga ee ardayga. FIIRO GAAR AH: Dugsiyada Theme ma lahan fasalada ku darista BFTS.

Canugeyga sadex-sanno jir ahwuxuu leeyahay IEP jira oo horaan ayaa looga diiwaangeliyay fasalka waxbarashada gaarka ah ee DCSD, miyaan ka diiwaangeliyaa Pre-K (3&4)?
Maya. Iyadoo ardayda baqtiyaanasiibka Pre-K (3&4) loo xusho nidaamka xulashada baqtiyaanasiibka wareegtada ah, ardayda leh Qorshaha Waxbarashada Gaarka ah (IEP) waxay meeleynta waxbarashada gaarka ah sida ka qeyb ah go'aanka kooxda IEP ee tixgeliyaa baahiyaha gaarka ah, shaqsiga ah, taageerooyinka ardayga, iyo adeegyada looga baahanyahay ardayda IEP. Ka hor intaadan gelin baqtiyaanasiibka Pre-K (3&4), haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan goobta carruurnimada hore oo aadka ugu haboon wax ka qabashada baahiyaha canugaaga, waxaa lagu taliyay inaad la xiriirtid maareeyaha dacwada canugaaga IEP, Macalinka hogaanka ee Waxbarashada Gaarka ah ama Waaxda Waxbarashada Heerka Sare @ https://www.dekalbschoolsga.org/exceptional-education.

Dokumentigee ayaa looga baahanyahay inuu ardayga u codsado baqtiyaanasiibka Pre-K (3&4)?
Cadeynta dhalashada, cadeynta masuulka sharciga ah (haddii magaca waalid/masuul uusan ku yaalin shahaadada dhalashada), cadeynta aqoonsiga waalidka/masuulka, iyo cadeynta daganaanshaha. Liis dhameystiran oo dhammaan dokumintiyada loo baahanyahay, iyo warbixin sharaxan, waxaa laga heli karaa iyada oo la riixayo badhanka "Dokumentiyada Loo baahanyahay" ama linkiga xiggo https://www.dekalbschoolsga.org/pre-k/.

Waxaan diyaar u ahay inaan codsado baqtiyaanasiibka onleenka 2025-2026 Pre-K (3&4), maxaan sameeyaa ee xigga?
Kadib aqrinta xasuusiyaha dokumentigaan oo guud ahaantooda iyo markii bogga codsiga baqtiyaanasiibka uu furmo, riix badhanka "Hadda Codso" ee aad ka heleysid linkiga hoose. Tan waxay ku geyneysaa websaydka meesha aad ka bilaabeysid arjiga baqtiyaanasiibka Pre-K (3&4). Bogga soo dhaweynta websaydka, waxaad ku arkeysaa tilmaamaha kaa caawinayo nidaamka arjiga. https://www.dekalbschoolsga.org/pre-k/

Ka qeybqaatayaasha Baqtiyaanasiibka 2025-2026 Pre-K (3&4)

Qeybtaan waxay siisaa warbixin waaladiinta/masuulada ka qeybqaatay ee nidaamka baqtiyaanasiibka onleenka 2025-2026 oo waxaa la ogeysiiyay helitaanka korsi ama lagu meeleeyo liiska sugitaanka. Hubi inaad aqrisid qeybta ugu dambeyso ee ku magacaaban, Warbixinta Muhiimka ah oo loogu tallogalay Dhammaan.

Waa maxay tallaabooyinkeyga xigo haddii canugeyga laga siiyo korsi baqtiyaanasiibka?

Haddii canugaaga korsi laga siiyo baqtiyaanasiibka oo aad rabtid inaad aqbashid korsiga, fadlan ku taabo badhanka aqbalida, ee ku yaalo boggaaga waalidka, 14 maalmood. Haddii aad dooratid inaad diido korsiga, fadlan ku taabo badhanka diidmada 14 maalmood gudahood. Dugsiga wuxuu u baahan karaa dokumintiga dib loo soo dirayo haddii aanan la aqrin karin ama taariiqda dhaafsan. Haddii aad tahay waalid DCSD oo la soo laabanayo canuga horaan uga diiwaangashanaa degmada, waxaad dhameystireysaa nidaamka diiwaangelintaada adoo isticmaalayo boggaaga waalidka. Fadlan kala xiriir caawin diiwaaniyaha dugsiga deegaankaaga, haddii aad u baahatid. Waxaad dhameystireysaa nidaamka diiwaangelinta onleenka “Ardayga Cusub” adoo isticmaalayo bogga Diiwaangelinta Onleenka Gobolka DeKalb ee aad ka heleysid https://www.dekalbschoolsga.org/online-registration/.

Waa maxay tallaabooyinkeyga xigo haddii canugeyga la geliyo liiska-sugitaanka inta lagu jiro nidaamka baqtiyaanasiibka?

Arday walba oo aanan loo xulan korsiga baqtiyaanasiibka waxaa si toos ah loo geliyaa liiska-sugitaanka. Fadlan gal Boggaaga Waalidka si aad u heshid lambarkaaga liiska-sugitaanka. Maadaama kuraasta la diido ama la lumiyo, dugsiga wuxuu ogeysiinayaa qoyska xiggo ee ku jiro liiska-sugitaanka. Waqtigaas, waxaa lagaa rabayaa inaad dhameystirtid tallaabooyinka xiggo oo lagu lifaaqayo korsiga canugaaga. Dugsiga wuxuu aqoonsanayaa wakiilka diiwaangelinta oo kala xiriirayaa waalidka/masuulka dokumintiyada loogu dirayo koronto ahaan -imeel.

Codsadayaasha Cusub oo Aanan Ka qeybqaadan Baqtiyaanasiibka Onleenka 2025-2026 Pre-K (3&4)

Qeybtaan waxay warbixin siisaa waaladiinta/masuulada oo aan u suurtogaleynin inay ka qeybqaataan nidaamka baqtiyaanasiibka onleenka ee 2025-2026 Pre-K (3&4). Hubi inaad aqrisid qeybta ugu dambeyso ee ku magacaaban, ***Warbixinta muhiimka ah pp loogu tallogalay Dhammaan.***

Sidee ayaan ugu codsan karaa korsiga Pre-K (3&4) canugeyga haddii qoyskeyga aysan ka qeybqaadan baqtiyaanasiibka?

Ku bilow la soo xiriirida dugsiga si aad u aragtid haddii uu jiro korsi la heli karo. Haddii uu jiro korsi furan, fadlan ku sii soco su’aasha xigto. Haddii aysan haynin kuraas la heli karo, ku soo dhawow inaad buuxisid arjiga liiska-sugitaanka oo aad ku soo dirtid labada arjiga iyo shahaadada dhalashada canuga elektaroonig ahaan oo dhinaca i-meelka oo wakiilka diiwaangeliyaha dugsiga. Haddii aadan hubin cid uu yahay wakiilka diiwaangelinta dugsiga, fadlan la soo xiriir dugsiga. Arjiga liiska sugitaanka waxaa laga heli karaa hoosta badhanka dulmarka ee websaydka degmada Pre-K. www.dekalbschoolsga.org/pre-k

Waa maxay tallaabooyinka xiggo ee la isaga diiwaangeliyo Pre-K (3&4) haddii dugsiga uusan laheyn kuraas la heli karo?

Ku dhameystir Codsiga Diiwaangelinta Cusub ee 2025-2026 onleenkaadiga oo riixayo ciwaanka xiggo https://www.dekalbschoolsga.org/online-registration/new-students/. Haddii aad tahay waalid DCSD oo la soo laabanayo canuga horaan uga diiwaangashanaa degmada, waxaad dhameystireysaa nidaamka diiwaangelintaada adoo isticmaalayo boggaaga waalidka. Fadlan kala xiriir caawin diiwaaniyaha dugsiga deegaankaaga, haddii aad u baahatid.

Dokumentiyadee ayaa looga baahanyahay in ardayda iska diiwaangeliyo Pre-K (3&4)?
Liiska dhameystiran oo dhammaan dokumentiyada loo baahanyahay waxaa laga heli karaa iyadoo la riixayo badhanka "Dokumentiyada Loo baahanyahay" ee laga helo linkiga soo socdo https://www.dekalbschoolsga.org/pre-k/.

Maxaa dhaca kadib markii aan dhameystiro Arjiga Diiwaangelinta Ardayga Cusub ee 2025-2026?
Dugsiga deegaankaaga ayaa kaala soo xiriirayo tallaabooyinka xiggo.

Warbixin Muhiim ah ee loogu tallogalay Dhammaan

Ka waran haddii aanan bixin karin Foomka Tallaalka Caafimaadka 3231 oo bilowga dugsiga?
Xeerka DCSD wuxuu sheegayaa in canuga uu haysto foomkooda Tallaalka Caafimaadka 3231 ee feelka ku jiro oo gudaha 30 maalmood oo canugooda bilaabayo dugsiga ama taariiqda dhacitaanka. Fadlan i-meel ku soo dir dugsigaaga haddii aad la kulantid dhibaato oo helitaanka iyo ku soo dirista dokumintigaan si koronto ah. Haddii foomka aan lagu bixin 30 maalmood gudaheed maalinta koowaad ee dugsiga kadib, canuga uma suurtogaleyso inuu ku soo laabto fasalka iyada oo aan jirin foomka ama cadeynta balanta. Canuga uma suurtogaleyso inuu ku soo laabto kadib balanta aan foom la cusbooneysiiyay laheyn. Haddii canuga uu maqanyahay 10 maalmood isku xigto sabab la xiriirto foomkaan oo aan lagu siinin korsiga canuga Pre-K (3&4) way lumeysaa.

Ka waran haddii aanan bixin karin Foomka Maqalka. Araga, Ilkaha iyo Nafaqada 3300 oo bilowga dugsiga?
Xeerka DCSD wuxuu sheegayaa in foomkaan uu ugu jiro feelka gudaha 90 maalmood oo canuga bilaabayo dugsiga ama taariiqda dhacitaanka. Fadlan i-meel ku soo dir dugsigaaga haddii aad la kulantid dhibaato oo helitaanka iyo ku soo dirista dokumintigaan si koronto ah. Haddii foomka aan lagu bixin 90 maalmood gudaheed maalinta koowaad ee dugsiga kadib, canuga uma suurtogaleyso inuu ku soo laabto fasalka taas oo sababi karto in canuga laga saaro barnaamijka.

Miyuu jiraa xeerka ka qeybgalka oo loogu tallogalay ardayda Pre-K (3&4).
Haa, waxaa jiro xeerka ka qeybgalka oo loogu tallogalay ardayda Pre-K (3&4). Ardayda waxaa laga filanayaa inay ka qeybqaataan oo ay ka qeybgalaan maalinta waxbarashada buuxdo inta lagu jiro sannad dugsiyeedka oo dhan. Haddii canuga soo daaho ama maqanyahay toban maalmood isku xigto iyadoo aan jirin cudur daar caafimaad, canuga waa laga saarayaa fasalka sida waadaqsann dhinaca baratokoolada iyo tilmaamaha ka qeybgalka degmada ee Bright from the Start. Intaas waxaa dheer, la taliyaha iyo/ama shaqaalaha bulshada ayaa la soo xirirrayo waaladiinta/masuulada haddii canuga leeyahay naqshada soo daahitaanka xad dhaafka ah ama ka tagida dugsiga xili hore.

Miyay jiraan wax sharuudaha ka qeybqaadashada ee waaladiinta/masuulada Pre-K (3&4)?
Haa, waaladiinta/masuulada waxaa laga filanayaa inay ka qeybqaataan dhammaan kulmada waalidka/masuulka jadwaleysan iyo shirarka ugu yaraan labo jeer sannadkiiba iyo inta badan haddii ay muhiim tahay. Dugsiga iyo/ama macalinka Pre-K (3&4) ayaa ku soo ogeysiinayo goorta waqtiyada kulanka/shirka dhacayo oo ku siinayo maalinta jadwaleysan iyo saacada la kulmayo. Howlahaan waxay soconayaan waxay soconayaan qiyaastii hal saacadood.
Ka wraan haddii aan su'aalo qabo oo aanan lagu sheegin FAQ?

Xoriyad dareen aad kula xiriirtid Waaxda Waxbarashaa Hore iyo barnaamijyada Pre-K ee PreKRecords@dekalbschoolsga.org.